# Golaha Wakiilada JSl

## Waaxda Hadal Qoraalka

*Minuteska*

**Dooda Xeerka Nidaamka Ururada iyo Axsaabta Siyaasadeed**

**Kal- fadhigii 15aad          Fadhiyadii 19,20,21 iyo 22aad          20-25/07/2011**

***Doodan waxaa ka qayb qaatay 28 Mudane, waxayna Socotay3 maalmood, waxay bilaabantay 20/07/2011 waxayna dhamaatay 25/07/2011kii***

**Maalintii 1aad ee Dooda Mudanayaasha:-**

1. **Md. Saleeban Cawad Cali:-** Salaan ka bacdi mudanayaal xeerka 14aad ee ka hadlaaya habaynta, nidaaminta axsaabtaiyo ururada siyaasadeed ee maanta goluhu doodisa bilaabayo waxay iigu muuqataa in xeerkani aad xasaasi u yahay in fara badana ay bulshadu sugaysay. Haddaba mudanayaal waxaan qabaa in la siiyo tix galin dheeraad ah lagana baaraan dego haday tahay xaga wakhtiga iyo taladaba, waayo golaheena waxaa lagu xantaa in xeerarku aad u dheereeyaan oo laga yaabo in laba ama saddex cisho uun lagu dedejiyo, taasna aan ka taxadarno.

Mudaayaal maanta golaheena waxaa hor yaala soo jeedinta ka timid Madaxweynaha iyo golaha wasiirada iyo soo jeedinta guddida difaaca iyo nabad galaydaee golaha wakiilada. Haddaba labadan nuqul ee na horyaala waa isku dhaw yihiin, wax badan oo ay ku kala duwan yihiina ma jirto marka laga tago ilaa saddex qodob.

Mudanyaal Xeerkani waxa uu diyaarinayaa doorasho sida loo kala saarayo axsaabta IWM. Laakiin anigu waxaax qabaa in doorashooyinkeena oo dhan ay dabada ka riixaan cid kale sida (international donors community) badanaa waxa ay ku leeyihiin awoodo faro badan, inta badana iyaga inaga taageera, waayo anigu awood badan ma lihin, haddaba waxaan qabaa ninka debada kaa jooga dantaada hoose ma oga.

Sidaas darteed waxaan odhan lahaa duruufteena gudaha ha ahaato ta xadidaysa wakhtiga iyo sida lo qabanayo doorashooyinka. Tusaale ahaan haddi ay doorashadu ku soo beeganto wakhti jiilaal ah ama colaadi wadanka ka jirto inagaa arimahaas xog-xogal u ah.

Tusaale kale haddaan soo qaato laba sanadood ka hor waxaan galay diiwaan galin, diiwaan galintas waxaan ku galay doorasho kaliya oo ah ta madaxtooyada, ta kale diiwaan gelintaas waxaa dhin naga soo gadhay waad ogaydeen iyo sida la isugu qabsaday.

Haddaba anigu waxaan odhan lahaa mar haddi aynu xeerkan kaga hadlayno doorasho, waa in aynu u soo horeysiinaa diiwaan gelinta oo aynu saxnaa waayo maaha markay soo dhawaato doorashada dawladaha-hoose in aynu isku qabsano diiwan galintii, inaguna bilaabanto carqalad siyaasadeed, waxaynu wada ogayn in diiwaan galinteena in goobaha qaar server-ku daadiyay dadku laba noqnoqday qaarna aanu daadin. Khubaradii noo keentayna way ogaayeen in server-ka khalad ku jiro wayna cadeeyeen. Haddaba waxaan soo jedin lahaa in muhiimad imika la saaro in diiwaan galinta la saxo si hadhaw aynaan isugu qabsan.

Haddaba anigu xeerkan saddex qodob ayuun baan wax ka odha lahaa

**a.** Anigu waxaan odhan lahaa commission madaxweynuhu soo jeediyay in loo daayo waayo inaago aan haysan dhaqaale buuran oo aynu ku abuurno commission kale.

**b.** Ta kale waxaan odhan lahaa wakhti kasta ha inagu qaadatee in la helo gudidii diwaan galinta shaqadeeduna noqotoin ay kala saarto wixii urur noqonayo iyo wixii xisbi noqonayo,

**c.** Ta kale tirade diiwaan gelinta guddidu waxay noqonaysa wuxuu xeerku ku sheegayaa 7 xubnood . Anigu waxaan qabaa in 7 xubnood ee guddida madaxweynuu soo magacaabo.

Waayo hadii inagu gole ahaan qaar keeno waxa ay noqonaysaa in inagu qaar keenay hadana inagu aynu ansixinayno, markaas hadii aynu inagu leenahay ansxintii yaynaan yaynaan magacaabista lahaanin, hadaba sidaas darteed (7) xubnood waa in madaxweynuhu keenaa, ciduu doonayana hala kaashado.

Ta ugu danbaysa waxaan odhan lahaa in gudida ku ansaxdo cod haldheeri ah, oo hadii golaha 42 fadhido, waa in ay hal dheeri noqotaa, maadaama ay tahay gudi xaasaasiay.

Deebaaajiga (ama lacagta) tan (20.000) labaatan kun oo doolar anigu waxaan odhanlahaa xagee ayay ku danbaynaysa ma waxa ay geleysaa miisaaniyada?

Waxaan soo jeedinlahaa xisbiyadii hore u jirey iyo kuwa cusuba halaga wada qaado lacagtaas deebaajiga ah ee (fee) maxaa yeelay shaqadaa loogu qabanayaa lacagtaasna halagu magacaaabo (fee) S/J (20) dollar, waaan taageerayaa laakiin waa in wada bixiyaan dhamaan xubnaha xisbiga wada samaysanayaa.

2. **C/qaadir Jaamac Xaamud:-** Mudanayaal waan idin salaamayaa dhamaan gudidiii xeerkan kazoo shaqaysayna aad ayay u mahad sanyihiin sida fiican ee ay uga soo shaqeeyeen,

Qodobka3aad/F/3. Ee sheegeysa in madaxweynuhu soo magacaabo 3 xubnood, ( anigu waxaan qabaa 7 xubnoodba m/weynuhu soo wada magacaabo mana haboona in mudanahu yidhaahdo anaa soo magacaabaya ansixinayana.

Qodobka6aad/F1aad-(xisbiga hela 10%) anigu waxaan odhan lahaa in layidhaahdo 20%.

Qodobka11aad/F1aad-waxa ay xadidaysaa qodobkaasi in mudharax madaxbanaani jiri Karin, ( hada anigu waxaan soo jeedinayaa in aynu dimuqraadiyada balaarino oo lagu daro xeerka musharax madaxbanaan In uu jiri karo, isna soo sharaxo, waxaan kale oo soo jeedinlahaa mar hadii aan doorashadii Dawladaha Hoose galayno, in aynu saxno diiwaangelintii oo khaladaad badan ku jirey wax walbana ka hor marino oo kaadhadhkii dib loogu noqdo.

Sidaa darted waxaan soo jeedinayaa:- marka xeerka meelahaan wax ka badalno lagu soo guro, aynu ansixino xeeka.

3. **. Aadan Xaaji Diiriye:-** Mudanayaal aad ayaad u mahad santihiin waxaan qabaa in ay luntay daacnimadii iyo awoodii dadkan umada xil u haya, waxaana naga xoog roonaaday qabyaalad, hayado wadaniya iyo kuwo ajaanib ah iyo kuwo ku loolamaya dhaqaale, Sidaas darteed waxay lumiyeen awoodii goluhu lahaa, awoodii xukuumadu lahayd, takale waxaad moodaa xeerarkaas noo yimaada xeer ayna dabada kawadin Hayado, Shirkado ma jiro.

Halkan waxaa na horyaala laba nuqul oo layidhi mid waxa uu ka yimi madaxtooyada laakiin waxa uu ka yimi cilmi baadhista iyo akaademiyada, golahana waxaa xeer uga imankaraa xukuumada ama xerka halkan lagu curiyey, mid muwaadiniin ka yimid, markaas halkan waxaan ku hayaa mid sadexaad midna kama iman ( Gudoomiyahaa saxay in uu m/weynaha ka yimid) hadaan usoo noqdo xeerkan,Q1aad/F11aad-waxaan xagiisa danbe ka raacayee( iyo gudida fulinta) waa nuqulkii gudidu soo samaysay.

Qodobka2aad-ee nuqulka Guddida Arimaha Gudaha F/2 waxan ku kordhiyey( waa inay ku ilaaliyaan kuna kormeeraan habka anshaxa tartanka doorashooyinka)Q2aad?F2- ee nuqulka Arimaha Gudaha ( waxaan ka saaray qodobka labaad ee aan ka danbaysiiyey qodobka sadexaad ( markaas aniga waxay ii noqonaysaa qodobka 4aad( iyadoo aan wax loo dhimaynin qodobka 3aad ee sheegaya ururada/xisbiyada siyaasadu waa inay ku salaysnaan Qabiil, Diin, lab iyo dhedig keliya ama nooc kasta oo wax kala faquuqaya.

Hadaba waxa aan ka danbaysiiyay iyadoo aan wax loo dhimay haweenka iyo dhalinyarada muhiimad la siiyay.

Qodobka /2aad/F6aad- waan fahmi waaye, marka ururad isku tagaan baa mise waa marka iskaashi sameeyaan. Isku tag iyo isbaahaysai waa in mid la isticmaalo markaa taas waxaan doonayaa in la sax afsoomaliga.Qod/3aad/f1 (waxan ku daraya oo loo bixiye gudida diiwan galinta ururdad siyaasiga ah iyo ansixinta axsaanbta ) xaga danbaan kaga daray.Qod3aad/fx

waxan ka dhigay gudida mudadiida mudo 5 sano ah halka ay ka tahay sanadQod3aad/f3 waxaan awooda siiyay m/waynaha inuu gudida soo magacaabo

Qod3aad/f4 gudidu waxa ay yeelanayaan gunno, waxaan qeexaya xeer gaar ah (anigu waxan ka dhigay ( gudidu waxa ay yeelanayaan guno, waxa ayna la mid noqonatysaa gunada la siiyo komishanka dooroshooyinka) halkaa ka doondooni lahay xeer aan ugu samayno gun iy ku doodis maadaama awoodi iskaga mid yihiin.Q4aad/F1 waxaan u kala beybiyeey laba qaybood oo kal ah :

1. Gudidu waxa ay ku baahniaysaa warbaahinta dalka mudada qabashada codsiyada
2. Diiwangalinta ururada siyaasadeed iyo mudada dhamaadka qabashada codsiyada diiwan galinataiyo cinwaanka lagu soo hagaajinayo ee xarumaha gobolada/degmooyinka dalka.

Q4/f/A: mudada qabashada codsigu waa laba bilood gudahood oo ka bilaabmaysa maalinta la bilaabo baahinta qabshada codsiyadaQ4/f/B: waxaan ku daray faqradaas (liiska xubnaha golaha dhexe oo ay soo saxeexaan gudida fulintu)Q4aad /FE waxan ku daray F/D ciwaan dhamaystiran oo laga helo ururada siyaasadeed ee degmo iyo gobolQ6aad inta ka danbaysa faqrada 4aad wan ka saari lahaa faqarada (5,6,7,) ee qodobka 6aad Q/6aad/F1 saamiga xisbiga loo aqoonsayo waxan ka dhigi lahaa 15%

Q7aad (waxaan ku daray faqrada /6 oo ah (tarame kasta oo u gudbi waaya doorashooyinka golayaasha deeganka kursina ka hel;a deegaanka sidiisa ayuu ugu jirayaa isagoo ku qumaysan ururada siyaasiga) Q8aad/F/1 (waxan idhi shahaadadiisa xisbinimo qaran) marka siyasaadan meesha ka saarey Q8aad /F1/D waxbaa ka dhiman faqradaas xagiisa danbeQ 11aad/F/1/B muwaadin Somaliland ah, xisbina ah markaas waxan odhan lahaa miayaanay ururada wax ka soo baxayn musharaxin ma xisbi uun baaQ 12 waan asaxi lahaa (waana qayri dastuuri)

Qod 16aad /F/2 waa in lamaanihiisu yahay muwadin reer somaliland ah taas waan kadaran lahaa waayo qofku wuu soo guursan karaa ajaanibQod 17aad- waxaan ka badalay (komishan) oo aan u bedalaya (Xafiiska gudida)Qod 19aad/F/2 (deeq ama hayad) waa in la xadidaa hantidaaQ 19aad/F/3 deeq ama mucaawino ay bixinayso dawladu (waa in la cadeeyo)Q 20aad(meelaha ay ku taalo xisbiyadda siyaasadeed waa in laga dhiga xisbiyada qaran).

4. **Aadan Tarabi Oogle:-** dhamaantiin waad salaaman tihiin, maan soo wada eegin xeerka akhriskiisa laakiin waxaan soo eegay qodobaan is idhi waxay u baahan yihiin in hoos loo eego, sida qodobadan hoose:-

**Qodobka 3aad** ee (gudidda diiwaangalinta ururada siyaasada ah iyo ansixinta asxaabta qaranka), aniga waxay iila muuqataa inaan waqtigan loo baahnayn gudidan waayo waxay jira komishan qaran oo xilsaaran doorashooyinka takale hawsha waxaa jirta gudi noo qaban karta oo waaya aragnimadeedii leh.

**Point of order:-** gudoomiye gudidan waa distuuri oo dastuurka ayaa sheegaya inay kala nidaamiso ururada doorashooyinka.

**Xill. Aadan** aniga waa siday iila muuqato waayo haday distuuri tahay gudidan lama baabi'iyeen.

Qodobka sheegaya furista ururada oo markii hore inoogu qornaa 20% ayaa iminka u dhigan 10% cida waliba yaanay furan xisbiye sidan hore ha loo daayo, **Qodobka 3aad** deebaajiga anigu waxaan gaadhsiinayaa **5$0,000 oo dollar** waayo lacagta shakhsi kaliya ma bixinayo..

5. **Cali X. Maxamed:-** anigu waxaan qabaa in xeerkani yahay muhiim gudida soo diyaarisayna aad bay u mahadsanyihin, xeerkan bulshadu aad bay ugu baahan tahay marka loo eego dhibaatooyinka naga soo qabsaday doorashooyinkii hore oo waqti badani nagaba lumay takale aad baan u raacsanahay xilldhibaanada soo jeediyay xaga dhaqaala in Gudidda Doorashooyinka ee hada jira oo khibrad wanaagsan leh in ay iyagu shaqadan qabtaan oo hada aynaan sameyn gudi cusub xilkana aynu idmano iyaga.

Sidaas darteed hadaan xeerka dib ugu noqdo **Qodobka 2aad F/6aad** waxaan ka saari lahaa ( si hadhaw loogu maareeyo khilaafaadka iman kara) oo ah intaas faqrada ugu danbaysa, waayo ma qurux badna.

Qodobka 3aad/F/1aad Xarafka(T)/qaybta 9aad. Waxaan soo jeedin lahaa ha la sheego ama ha la cadeeyo shuruudaha faqradu ku qoran ee garsoorayaasha lagu soo dooranayo. Qodobka 4aad/F/2aad Xarafka (X), ee sheegaya debaajiga, waxaan ka dhigayaa $30 kun oo dollar, waayo qofka raba doorasho lacagtaasi way yartahay waa in la kordhiyaa.

Qodobka 5aad/F/3aad(T). halka ku qoran 500 oo xubnood gobolkasta waa in laga dhigaa 1000 xubnood, Qodobka 8aadF/1aad(D) waxaan ku darey xaga danbe oo ka maqan ( Maxkamada Dastuuriga ah) Qodobka 12aad anigu waxaan odhan lahaa qodobkaas waa in laga baaraan degaa waayo waa qodobka aynu u fadhino meesha ee ka hadlaya musharaxa doorashada u taagan, iminka Gudoomiyihii baa laga fur furi la'ayahay, markaa qodobkaa yaan sidaa laga tagin waa halka sartu ka qudhantaye.

Qodobka 16aad/F/3aad- waxaan odhan lahaa da'da waxaan ka dhigi lahaa 35 ugu yaraan halka ay ka tahay 30 jir. Isla qodobkan Faqradiisa 4aad meesha ha laga saaro oo ha lagaliyo faqrada 6aad iyadaa tilmaamaysa, waayo labaduba waxay sheegayaa xukun maxkamadeed inaanu ku dhicin. Qodobka 19aad/F/3aad- deeqaha dawlada bixinayso ha la cadeeyo oo Faqrad 4aad-halaga dhigo. Intaas ayaan ku soo gabagabaynayaa.

6. **Cali Maxamed Aadan:-** horta xeerkan in wax laga badalo oo la isku hagaajiyo waayo aragnimadii la soo maray aad ayaa loogu baahnaa, wayna fiican tahay xeerka in aynu isku hagaajino, laakiin waxaan u arkaa in xeerkani umada iminka dan u yahay, xiligana maaha

wakhtigiisii, waxa uu xeerkani na galinayaa dhibaato iyo carqalad cusub ilaa saddexdan arrimood wax laga qabto ayaan qabaa:-

- ⇒ In gobolada iyo degmooyinka wax laga qabto waayo waxaa jira 7 Gobol oo aan kala xadaysnayn, Gabiley ma ma yeelanaysaa in Hargiesa la saaro, waa in Gobolada cusub la soo qiimeyaa oo la soo soo kala xadeeyaa, hadii kale xagee doorashadu ka dhicidoontaa, markaa waa in la soo kala xadeeyaa Gobolada iyo Degmooyinka cusub.
- ⇒ Waa in diiwaangalin sax ah la helaa oo cidii aan la diiwaangalin ee iminka wakhtigan gaadhay waa in la diiwaan galiyaa, lana helaa diiwaangalin sax ah, waayo waxaad modaa in diiwaangalintii hore dhibaato ka taagneyd.
- ⇒ Waxa aynu qabanaa doorashooyin sida tan M/tooyada, baarlamaanka Guurtida iyo dawladaha Hoose, hadaba inteynaan kan ka hadal, awoodeenu way iska yar tahay dhaqaale ma haysano, maalin walbana doorashaa in hortaal, markaa waa in laga dhigaa doorasho oo kaliya, waana in Go'aan loo dhan yahay laga soo saaraa Fulinta, Garsoorka iyo Xeer-dejintuba.

Qodobada marka aynu helno, Ururo waan furan karnaa, xisbiyana waan furan karaa, todobadaa gobol kan aan gobol qaadan karina waa in laga saaraa. Hadaba xeerka hadaan u soo noqdo.

**Qodobka 3aad-** anigu Gudi Diiwaangalinta Gudi joogto ayaan ka dhig lahaa, soo xulista Gudidana inaga xaaraan inagama ah, laakiin waxaan soo jeedin lahaa Madaxweynuhu ha soo magacaabo inaguna aan ansixino.

**Qodobka 2aad**. Waxaan aan qabaa in qof laba jeer is sharaxay oo dhacay inaanu dib isku soo sharaxin, laakiin waa shaqadii xisbiga ama awodihii xisbiga. Qodobka 5aad/F/8aad halka ay ku qoran tahay Qof kasta oo u dhashay Somaliland anigu waxaan odhan lahaa qofka sinjiyada qaatay ee aan u dhalan miyaanu somalilander ahayn oo isa soo sharixi Karin, Hadaba anigu waxaan ku dari lahaa ( ama qaatay sinjiyada si waafaqsan sharciga)

Qodobka 6aad/F/1aad- saddexda urur ee doorashooyinka Dawlada hoose ka helaa 10% ayaa loo aqoonsanayaa, halkaa waxaan soo jeedinayaa in la dhigo saddexda xisbi qaran, waayo ku guulayasteen oo ururadii way ka soo baxeen.

7. **Xamse Maxamed Gaadaweyne:-** mudane gudoomiye waxaan qabaa in gudidu aad u soo dedaaleen wax wanaagsan ay soo qabteen si wanaagsan ayay u soo tafatireen wax ka badal caynkaasi ahina meesha iigama muuqdo, hadaan ka hadlo dhowr qodob:-

Qodobka 7aad/F/4 iyo 5aad- waxaa ka maqan ciqaabtii, sida hadii falkaasi ay sameeyaan xisbi hanta qaran u isticmaala hawlihiisa iyo haday ciidan hubaysan adeegsadaan xisbi, markaa

dhamaan ciqaabtii baa ka maqan. Qodobka 8/F/1aad(B)- waxaan garan waayay hay'ada ku shaqada leh.

Qodobka 11aad/F/1aad(T)-faqradaas waxaan u arkaa mid aan dimuqraadi ahay aduunyadana waa ka jiraan qof musharax madaxbanaan ahi inuu isa soo sharaxi karo, wax u diidayana iima muuqato, hadaba waxaan odhan lahaa, qodobkaas meesha ha laga saaro, Qodobka 12aad/F/`1aad- faqradaasi waa qayru dasrtuuri oo muwaadinku xaq ayuu u leeyahay inuu jaanis labaad la siiyo haduu mar dhaco, hadaba faqradaa iyana meesha ha laga saaro ayaan soo jeedinayaa.

8. **Maxamed Axmed Obsiiye:-** way mahadsanyihiin Gudidda soo diyaarisay xeerka waa xeer fulinaya balanqaadyadii xisbiga Kulmiye, xeerkani ahmiyad weyn ayuu u leeyahay dalka, mahadweyna waxaan u celinayaa xukuumada soo diyaarisay. **Qodobka 1aad/F/4aad-** waa in lagu khatimaa xisbiya/urura la aqoonsanyahay shuruuda furashada xisbiyada si waafaqsan xeerka, isla qodobka F/6aad- waxaan ku dari lahaa (ama aan haysan jinsiyad Somaliland ah). F/10aad- ee doorashooyinka Qaranka hadaba hadii lagu tilmaamay doorasho miyaanay tan degaanku ahayn Doorasho Qaran, hadaba waxaan soo jeedin laha in doorasha Golayaash deegaanka lagu saleeyo Darajada A,B,C (A) waa in laga dhigaa doorasho toos ah kuwa kale Liis.

   Qodobka 2aad/F/3aad- waxaa ku qoran ururada Xisbiyada Siyaasada ayna ku salaysnayn qabiil, urur diineed, Hadaba waxaan odhan lahaa shacbigu 100% waa islaam markaa waa laga saaraa (Urur diineed) waayo mar hadii dastuurku mudnaanta Kowaad siinayo Diinta Islaamka.

   Qodobka 5aad/2aad waa in laga dhigaa lixbilood halka saddexda bilood ah. Qodobka 3aad- waxaan taageerayaa yaynaan soo xulida shaqo ku yaalan oo Madaxweynuhu ha soo wada xulo. Qodobka 5aad/F/3aad waxaan qabaa habraaca loo soo xulayaa inuu yahay mid khaldan waayo ma cada. Qodobka 6aad/F/5aad----------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------- DIB U DHAYSO CAJLADA.

9. **Maxamed Nuur Caraale:-** Mudanayaal Xeerkan Lr. 14 ee nidaamka Axsaabta badan iyo Ururada Siyaasadaah, waa xeer dhaqan galay oo lagu shaqeeyay, iminka waa kaabis iyo wax ku kordhin lagu samaynayo, Hadaba waxaan qabaa:-
   - Waa inay toosisaa wixii aynu tabanaynay doorashooyinka hore u dhacay
   - Waa inaan loo eegin dan iyo baahi ka timi cid gaara ah
   - Waa inaan xeerka laga saarin qodobo baahidoodu aanay ka iman shaqadii la soo qabtay, xeerkani maaha xeer tartan doorasho ee waa xeer nidaaminaya Axsaabta iyo Ururada Siyaasada, markaa tartan u qabashada iyo nidaamka Dhismaha ururada waa kala duwan yihiin.

Mudanayaal waxaan taageerayaa sidii hore xeerkan fulintiisa ay u lahayd Gudidda Diiwaangalinta Ururada iyo Axsaabta Qaranka, anigoo magaca xeerka garawsan, maanta dhaqaale buuran loo heyn, hadaba waxaan aan u soo noqdo xeerka-

Qodobka 2aad/F/6aad- sixid iyo wax ku dar ( marka ay dhacdo in laba urur iyo ka badani isu tagaan ama urur xisbi ku biro si ay u samaystaan isbahaysi in horeysa doorashooyinka Golayaasha Deegaanka waxaa loo Gudbinayaa Diinwaangaliya ( Gudidda Diiwaangalinta).

Qodobka 3aad- dhismaha Gudidda iyo Mudada xilkoodaba waxaa ayidsanahay in daayo sida ku cad Xeer Lr. 14kii hore, magacaabista Madaxweynaha ayaan siinayaa, Ansixintana Golaha Wakiilada, Mudada Xilkoodana waxaan ka dhigayaa 5 Sano.

Qodobka 4aad- waxaan ku daray Faqrad 3aad- oo ah, (Axsaabta siyaasadu waxay u gudbinayaan gudida diiwaangalinta liiska Gudidda Fulinta iyo Golaha Dhexe.), Qodobka 5aad- ( Cinwaan Sixid) Xisbiyada Siyaasada iyo Ururada ku Meel gaadhka ah, F/2aad- mudada hawlgalada Xisbi/urur 3 bilood way yartahay lix (6) bilood ha laga dhigo. Qodobka 5aad- waxaan ku daray faqrad 3aad- oo ah sidan (dhamaan shuruudaha Qodobka 5aad waxay dhaxeysaa Urur/Xisbi) markaas halaga reebo F3aad Xarafkeed (T) oo u gaar ah urur.

10. **Maxamed dhunkaale Guutaale:-** anigu waxaan u arkaa in xeerka ay ku jiraan madmadaw fara-baban, markaa Qodobka 3aad cinwaankiisa waxaa modaa inuuu huwan yahay laba magic, markaa Gudidda diiwaangalinta ansixinta axsaabta waa in laga saaraa, F/2aad (T) waa in dada laga dhigaa ugu yaraan 30 jir, 60 jirna aanu ka weynaan. F/2aad(X) Gudidu waa inay xilka haysaa sanad iyo lix bilood. Qodobka 6aad- waa in laga dhigaa Ururada Xisbiyada u Gudbayaa inay Helaan 15%, waxaan soo jeedin lahaa waa in la siiyaa tiro oo la yidhaahdaa haday intaas gaadhi waayaan xisbi ma noqonayaan, sidoo kale waxaan qabaa, in la cadeeyo hadii gobolada kala bataan sida loo kala saarayo, xilldhibaanada soo baxayaa ma liisbaa mise waa sia kale.

**Qodobka 7aad/F/3aad-** xisbi walba waa in aan ka helin dhaqaale ilo shisheeye, waxaan soo jeedin lahaa in liika Golaha deegaanku noqdaa mid lagu tartamayo, Qodobka 7aad/F/1aad- waa in cadeeyo hadii xisbi soo gudbiyo been, wax beenta lagu ogaanayo, beenta ma halbeeg baa lagu eegyaa, faqradaas waa in la tilmaamaa waxyaabaha ka reeban ee warka beenta ah.

Qodobka 8aad/F/1aad(J) waa in laga dhigaa ( waa inaan la cubudhin Karin lana xidhi Karin xisbi hadaanu ka hor iman sharciga, Qodobka 12aad- waxaan odhan lahaa hadii xisbi soo ceshado musharaxooda laba iyo saddex jeerba, arrinkaas waa in loo dhaafaa xisbiga, ------------------

11. **Mshamed Faarax Qabiile:-** Waad salaamantihiin mudanayaal halkan waxa na horyaala laba nuqul, mid xukuumadu keentay iyo mid ay keentay gudida arimaha dibeda.Haddaba aniga

waxaan odham lahaa waa in la cadeeyaa sida look ala reebayo xisbiyada qaranka. Guddida kala reebaysa xisbiyada waa in ay noqotaa mid ka madax banaan cid walba.

Ta kale anigu waxaan odhan lahaa labada nuqul ee ina horyaala waa in mudnaanta la siiyo ka ay soo diyaarisay guddida arimaha guduhu. Anigu waxaan qabaa in xeerkani ku yimid xisbiyadii hore u sameysnaa oo gaf weyn u geystay dimuqraadiyadii muwaadiniinta Somaliland.

Anigu waxaan odhan lahaa guddiadaasi ha noqoto guddi madax banaan oo ay soo xuleen golayaasha sharci dejinta. Todobada xubnoodna waxaan odhan lahaa waa in ay noqdaan goloha guurtida 3- xubnood, golaha wakiilada 2-xubnood waayo waxaan ka cararaynaa in is dhex-gal dhaco.

Waxaan kale oo taageersanahay in mandate-ka xisbiyadu noqoto 10 sanadoodba mar.Q 12aad waxaan odhan lahaa ion qofku isku soo taago doorashada laba mar halka laga yidha mar.Deebaajiga laga qaadayo xisbiyada waxaan odhan lahaa in ay noqoto US $5000. Haddii laba urur isku cod ka helaan gobolada wa in lagu kala saaraa tirada badan

12. **Ibraahim Axmed Raygal:-** marka hore gudoomiye wax salaaman tihiin salaam ka dib, mudanayaal marka hore aynu xeerka ka doodeyno, waxaan soo jeedin lahaa marka doodu naga dhamaao in ay saarno gudi garyaqaano ah iyo sideeda gudoomiye ee Gudiyada Golaha iyo xildhibaanadii looga maarmi waayo, si ay dib ugu shaandheeyaan qodobada is weydaarsan ee qayru dastuuriga ah, Hadaan xeerka u soo noqdo, Qodobka 1aad/F/3aad- waxaan ku dari lahaa xageeda danbe eray bixinta xeerka waxaan odhan lahaa ( Xeerka 14 oo kaabis iyo wax ka badal iyo kaabis lagu sameeyay).

    Anigu ma ogoli Gudidda diiwaangalinta ee hawshaa waxaan u deyn lahaa Komishanka Qaranka, Qodobka 2aad- waxa uu ku joogaa Faqrada 6aad, hadaba waxaan ku dari lahaa Faqrad cusub oo ah( ururkasta/xisbikasta waxaa lagu qiimaynayaa aragtidiisa gooni isu-taaga Somaliland).

    Qodobka 16aad/F/5aad- anigu faqradaas waan ka saarayaa meeshaba, waayo waxaa jirdad dad badan oo degan debada oo karti iyo aqoonba leh, faqradaasi waa mid dad kala-sooc ah. Qodobka 11aad/F/1aad(T)-oo odhanaya ma banana musharax madax banaan oo aan magic xisbi wadanin inuu isa soo sharaxo, hadaba waxaan faqrada ku biirinayaa (hadaanu ahayn haween ama dadka la hayb sooco), Qodobka 4aad/F/2aad(X)- Deebaajiga waxaan ka dhigi lahaa anigu $100,000 oo Dollar, waxaan kaloo ku darayaa in saddexda xisbi Qaran ee jiray iyana $100,000kaa kun ee Dollar ay shubaan.

13. **Maxamed X. Yuusuf:-** Mudanayaal anigu waxaan toos u galayaa Xeerka, Qodobka 3aad- waxaan soo jeedinayaa n Gudidda l magacaabayo la iska daayo, oo xilka lo daayo komishanka Qaranka, sababtoo ah dhaqaale ahaan iyo team ahaan iyo xidhiidhka ya leeyihiin iyagaa ku haboon, waxana wakhti inaga qaadanaya hadii la magacaabo Cusub.

**Qodobka 4aad/F/2aad(X)-**degbaajiga waxaan ka dhigi lahaa ($20,000 oo dollars), Qodobka 6aad/F/1aad- waxaan ku taageersanahay 10%, laakiin waa inay la xoojiyaa ay shaqaysaa Boqolaydu oo wax kale lagu darin.F/5aad 10 sano waan taageersanahay Xisbiyo Qaran saddexdooda mooyee inaanay  kuwa kale jirin, Qodobka 12aad- Qodobkaasna sidiisaan ku taageersanahay inaan musharaxa ku guul daraysta doorashada aanu markale isa soo sharixin.Qodobka 16aad/F/1aad- ee ah waa inuu degan yahay Somaliland waa in laga saaro waayo dadka badankiisu ma dagena Somaliland.

Qodobka 26aad/F/7aad- ee ah Golaha wakiilada ayaa xisbiyada dhexdooda ku ilaalinaya dimuqraadiyada, anigu waxaan odhan lahaa Gudidda doorashada halga dhigo oo ha lagu badalo, oo iyagu waajibaadkaa ha la siiyo maadaama ay jirayaan, hana ku ilaaliyaan Xisbiyada dhexdooda Dimuqraadiyada.

14. **Axmed Maxamed Nuur Kijaandhe:-** Runtii xeerkani waa xeer aad iyo aad muhiima, wuxuu baahanyahay in hufnaan ah loo eegaa, waayo xeerarka intaan si degdeg ah u samayno baa hadhaw khaladaad ka yimaadaa, waxaad moodaa in xeerkani uu madmadow farabadan leeyahay, markaa waxaan fiican inaynu wixii madmadow ah ka saarno oo wax simple oo la fahmi karo uu noqdo.

Markaan xeerka guda galo doodayda, Gudidda la leeyahay ha samayso diiwaangalin, waxaan leeyahay ha loo dhaafo Gudidda Komishanka Qaranka, sababtoo ah, Gudidda Komishanku waxay leeyihiin infrastructure oo hay'ada dhamaystiran Gobol ilaa degmo, maanta inaan hay'ada kale samaynaa ma dalkaynu duminaynaa mise waa hagaajinaynaa, yaynaan arrimaha murginine Gudidaa la tijaabiyay haloodaayo ayaan qabaa.

Xaga registrationka anigu laba jeer ayaan ka dhigi lahaa, mid Provitional registration ah, mid ku meel ku gaadh ah, oo la soo tijaabiyo oo shuruudahah caynaakaas ah buuxiyo, markuu shuruudahaa ka soo baxana ha la siiyo, Registration full ah oo dhamaystiran, Qodobka 4aad- codsashada diiwaan-galinta iyo Qabashada araajida, waxaan leeyahay (waa inuu ururku leeyahay Xeer hoosaad iyo Barnaamid urur) taasina kuma taalo waan ku kordhin lahaa oo waxaa kagadhigi lahaa (KH), halka 3 biloodna way yartay waa in laga dhigaa ilaa dhowr iyo tobon bilood.

**Qodobka 10aad-** waxay ila tahay sababaha lagu waayi karo xubinimda, waxaasi waxay galayaan Xeer-hoosaadka xisbiga oo waa wax xisbiga u yaala, Qodobka 11aad- kaasi sidoo kale xeer-hoosaadka xisbigay galayaan, intaas ka gaadhsiiyay waxaan jeclaa in bari la iiga dhigo,

15. **Baar Siciid Faarax:-** marka hore way mahadsanyihiin Gudidii xeerkan soo Hagaajisay, iyadoo mudaduna ku gaabnayd, si fiican bay u soo qoreen, laakiin anigu waxaan qabaa, xeerka waxaad moodaa in la dedajinayo, markaa xeerka degdega ha laga daayo, Gudida diiwaangalinta waxaan qabaa waa loo baahanyahay markaynu dib ugu noqono waaya aragnimadeenii.

**Qodobka 3aad-** waxaan odhan lahaa soo magacaabista Madaxweynuhu 2 xubnood ha soo magacaabo, xisbiyaduna xaq bay leeyihiin, ha soo magacaabaan 3 xubnood oo dhaarta xubnaha aynu ku aamino dhaarta sidaynu madaxweynaha ugu aaminay, 2 xubnood ee hadhayna Labada Gole haka qaybsadaan ama mid ha soo magacaabo, Qodobka 5aad/F/10aa(R)- waa in la cadeeyaa dhiirigalinta iyo sida loo dhiirigalinayo, waliba anigu waxaan ku dari lahaa iyo **( dadka laga tirada badanyahay in laga dhaafo lacagta), ,** markaa arrinta dhiirigalintaa ha la adkeeyo.

**Qodobka 16aad/F/2aad** qodobka halaga saaro faqradaa dhamaan, **(Secendment buu helay), Qodobka 2aad/F6aad** kalmada Dukumentiga kalmada in macneeyo weeye oo Somali lagu turjumaa, waxaan kaloo odhan lahaa, xeerku halaga baaraan dego, gobolo badan baan diiwaangashanayn siiba gobolda xadka, dadku iyagoo ku maqan xoolohodii baa la diiwangaliyay, markaa in diiwaangalin cusub la sameeyaa, mid kalena waa jirtaa, 5 sanaa laga joogay diiwaangalintii, dadbadan baa qaan gaadhay, markaa waxaan anigu soo jeedinayaa,inaan xeerka lagu degdegin oo halaga baaraan dego, oo horta diiwaangalin saxa ha la sameeyo.

16. **Maxamed X.Maxamuud Cumar Xaashi:-** dhamaan marka hore waan idin wada salaamayaa, wakhtigii salaadaa dhow, markaa anigu waan dedejinayaa, sida ku qoran **Qodobka 3aad-** Gudida diiwaangalinta ururada siyaasiga ah, anigu waxaan raacsanahay in Gudiga diiwaangalintu jirto oo aan loo deyn komishanka sababtoo ah, waxaynu soo marnay doorashooyin farabadan, inay axsaab soo sameeyaan waaya aragnimo uma yeelan baan u malaynayaa, laakiin anaga way na soo martay urur iyo axsaab baanu soo samaynay, dhibaatooyin badan oo iminka la iska tirayo ayaa soo baxaya, komishanku cid buu la shaqeeya sidii barigii dhowayd ay inter peace u diiday in diiwaangalinta la saxo, markaa hadaynu waxeeyna komishan u wada dhiibno inter peace baa ina xukumaysa.

    **Qodobka 3aad/F/2aad(X)-** anigu waxaan qabaa in 5 sano laga dhigo mudada gudida, oo xisbiyada dariiqa dimuqraadiyada ku ilaaliyaan, **Qodobka 4aad/F/2aad/(X),** waxaan odhan lahaa ha laga yareeyo lacagtaa oo **10,000,000** halaga dhigo dhaqaale la'aan ma jirtee maamul xumaa jirtee shaqala'aan baa ina haysee, waxaana ku dari lahaa Xaraf ah **(KH)** oo ah Ururaduna Xeer-hoosaadkooda waa in keenaan.

    **Qodobka 6aad-** waa in lagu cadeeyaa maadaama aanu xisbi ahayn,oo laga dhigaa urur ku meelgaadh yahay, oo ah 5 sano ee soo socda, F/2aad- iyana waa in la cadeeyaa sida loo kala saarayo, boqolaydaasi dalka murgi bay galinaysaa, waxaan odhan lahaa 10% Gobol kasta inaynu goyno codka guud wuxuu noqdo ayaan qabaa, Isla qodobkan F/5aad- anigu waxaan qabaa in waxan la xadaynaayo aynu ka baxno, jabuuti 10 sanay ku gaadhay, markaa anigu waxaan qabaa in 5 sanoba mar laga dhigo, oo 10kaa sano aynu ku gaadhno Multi-party system, Qodobada 6aad iyo 7aad anigu waan baabi'in lahaa.

**Qodobka 12aad-** Musharaxa ku guuldaraysta doorashooyinka, anigu waxaan qabaa in laga dhigo (Mushaharaxa Madaxtooyada ee ku guuldaraystta doorashada laba jeer, inaanu dib isu soo taagin Karin), Faqrada 2aad- ee haduu ku guulaysto inuu isu soo taagi karo musharaxa ku guulaystaa, qodobkaa looma baahna ayaan qabaa, dastuurkaa sheegay haduu ku guulaysto inuu isu soo taagi karo, xaqna wuu u leeyahay.

**Qodobka 14aad-** taasi waa sax in laga xaaraan timeeyo dadkaa inay samaystaan urur siyaasadeed, laakiin ka xubin ka noqoshadiisa, anigu waxaan u qabaa in muwaadinkaa xaq dastuuriya oo uu leeyaha in laga qaaday, markaa waa inaan laga qaadin, isna waa inaanu xubin fir-fircoon aanu noqon oo aanu ololeyn, laakiin haduu codaynayo xubin taageera ah buu noqon karaa, waxaan ku soo darayaa oo iyaguna aanay noqon Karin (komishanka Doorashooyinka Qaranka), waana in laga dhigaa taageere wey noqon karaan ee wixii kale uun bayna noqon Karin.

**Qodobka 21aad**- qodobkaa yaa fasiri Kara, waxay ila-tahay qodobadaa in aad loo cadeeyo, oo hadii uu xisbigu ku xadgubo dastuurka waa in la cadeeya wixii laga yeelayo, markaa taana ha lagu noqdo oo gudida diiwaanglinta sharci ay ku shaqayn karaan, ha loo sameeyo. Qodobka 26aad- halka Golaha wakiilada Gudidda nabadgalyada laga dhigay waa in loo badalaa Gudidda diiwaangalinta, faqrada 8aad- taasi miyaanay ku wanaagsanayn in loo daayo xisbiga Xeer-hoosaadkiisa, hadii loo dayn waayana waa in la cadeeyaa, Gudoomiye waan jeclaa, inaan wax badan ka hadlo, laakiin salaadii baa taagan. Waad mahadsantihii.

17. **Cumar Axmed Saleeban (Sanweyne**):- Gudida diiwaangalinta aniga waxay ila tahay markaan eegno halkaynu marayno, kharashaad aynu ku bixino in Gudi Diiwaangalineed, waxaan qabaa inaanaynaan Gudi diiwaangalin isku samayn, **komishanka Qaranka** aynu u dayno hawhsaa, dhaqaaleheenu inoo saamixi mayo, yaynaan kharashaadka isku sii korhdin, waan ognahay miisaaniyadii in la la’ayahay, shaqo laga helo waxaa ka wanaagsan inaynu kharashkaa savegarayno, **Qodobka5aad/9aad-** waxaan odhanayaa waxaa jira ciqaab iyo abaal marain, markaa halkaa ha lagu daro qofku haduu galo danbi ka soo horjeeda danaha xisbiga in Golaha dhexe approvegareeyo, Faqrada 10aad- waxaan ku sii dari lahaa Xaraf kale oo ah *(iyo dadka laga tiradada badan yahay).*

    **Qodobka 6aad/F/5aad-**halka 10sano ah way badan tahay, hadii la eeg hamiga siyaasadeed ee shacabka, xaq u malihin inaynu 10sano nidhaahno suga, markaa waxaan odhan lahaa xuquuqdaa muwaadinka ha loo sii-daayo, oo 5 (shan)tii sanoba mar ha laga dhigo ama marka dawlada hoose la dooranayoba, Musharaxa Xisbi Qaran ee ku guuldaraysta doorashada madaxweynaha, mar labaad isma soo sharixi karo, yaa u diidaya, markaa waxay ila tahay halkaa inaynu ka saarno qodobkaa.

**Qodobka14aad-** anigu qodobka waxaan qabaa sidiisa looga saaro, waa dadka halkaa lagu tilmaamay waa muwaadiniin, xaq bay u leeyihiin, way ka mid noqon karaan, laakiin waa inaanu noqon mid aktif ah, oo aanu Golaha dhexe galin, ilayn wuuba codaynayaaye, **Qodobka 16aad-** waxan leeyahay halkaasi waa takoor, haduu isagu muwaadin reer Somaliland ah yahay, maxaa inaga galay xaaskiisa, arrinkaasi waa meel kadhac, wuxuuna ka soo horjeedaa dastuurka.

Intaan soo eegay waxaa ii haday, ururada Furnaanaya, had iyo jeer wax la iskuma fur furo, oo waxaadan dhibaato ka arag lama taabtee waxaad dhibaato ka aragtay baa dib loo eegaa, markaa tii hore waynu ku liimaanaye sidii hore aynu dayno, markaa waxaan leeyahay saddexdaa soo baxa meeyo, sidii doorkii hore ururada hadhay ha ku kala baydhaan xisbiayda soo baxay.

18. **Axmed Ducaale Bulaale:-** anigu markaba waan galayaa xeerka, Qodobka 2aad- ee ka hadlaya mabaa'diida guud, wuxuu leeyahay ururadu waa inaany ku salaysnayn qabiil, lab iyo dhadig, markaa waxaan ku daray (*iyo Gobolaysi)*. Isla qodobkaa faqrad baan ku sii kordhiyay, waayo wuxuu leeyahay laba urur iyo wax ka badan haday isku biiraan si ay isku bahaystaan inta doorashada ka horeysa, waxaan ku daray ( haday ururadoodii ka guuraan waa inay magic cusub samaystaan oo ku bahoobaan).

Halka Gudida diiwaangalinta, anigu waxan raacsanahay in Komishanka Qaranka loo badalo, oo halkii G.Diiwaangalintu ku jirtay waxaan ku badalay Komishanka Qaranka, Qodobka 4aad (X) ee debaajiga, anigu waan kordhiyay waxana ka dhigay **150,000,000** in laga dhigo debaajiga, Qodobka 5aad- wuxuu ka hadalyaa wax la yiraahdo xisbiyada ku meelgaadhka ah, markaad akhrido cinwaanka iyo tax way kala duwanyihiin, markaa halkaa ha la iswaafajiyo, ururada ku meelgaadhka ahna, halaga dhigo.

Isla Qodobkaa F/10aad- xarfihiisa waxaan ku daray xaraf cusu, oo ka hadlaya (waa inay ilaaliyaan xoriyaadka iyo xuquuqda muwaadiniinta), Qodobka 6aad/F/1aad- halka 10% ah inuu ka helo, anigu waxaan ka dhigay, in laga dhigo 15%, faqrada6aad- iyadana contradictionbaa ku jira waa in iyadana la hagaajiyaa, Qodobka7aad/F/3aad- wuxuu mamnuucayaa in xisbigu isticmaalo iskaashi shisheeye, anigu waxaan odhan lahaa sida dhaqaalahaasi u imanayo waa ianay soo maraan wadada sharciga ah.

**Qodobka 8aad/F/(B)-** waa in la dhamaystiraa faqradaa oo lagu biixiyaa sidaan qabo, (Maxkamada Dastuuriga ah), **Qodobka 12aad**- Anigu 2 jeer baan idhi fursada ha la siiyo musharaxa xisbiga, isla qodobkaa, faqradiisa 2aad- waan masaxay waayo qodob dastuuriyaa qeexaya, xeerna waxba kama badali karo, Qodobka 16aad/F/2aad- Horta halka lamaanihiisa kalamadaa waxaan ku badalay ( Xaaskiisa).

Qodobka 25aad/F/1aad iyo Qodobka 6aad, way isburinayaan, Qodobka 25aad- runtii meelaha u baahan in aad loo dul istaago qodobadaas baa u baahan, Madaxweynuha talada hayaa hadii xisbiguusu doorashda Golayaasha deegaanka ku hadho maxaa dhacaya, anigu markaa waxaan ku badalay, Xisbigu talada wuu haynayaa inta xisbigiisii dhacayo, halkan sidoo kale waxaan

isleeyahay waxaa ka maqan Qayb iska dhan oo ah, ururada la furayo Matalan, natiijada ka soo bixdaa, haday ka liitaan kuwa jira, maxaa la samaynayaa.

19. **Xuseen Ismaaciil:-**anigu waxaan odhan lahaa xeerka dani inooguma jirto, hadaba hadii la inoo keenay waxaa ku talinayaa in xidlhibaanadawaxa ay yidhaahdaan waxba laga tegin, Qodobka1aad-23 gobol iyo Degmo oo hore u jiray kumaan koobeen ee gobolo iyo degmooyin cusub baa la magacaabay markaa degaanada xuquuqdoodii meedahay, Q3aad- waxaan odhan lahaa waa laga maarmaan in Gudi diiwaangalin la sameeyo, wakhtigoodana waxaan ka dhigi lahaa 5 sano sida komishanka.

    Debaajiga anigu waxaan soo jeedin lahaa **150,000,000** milyan, halka ay ka dhigeen 3 bilood wakhtiga waxaan ka dhigi lahaa inay ku diyaar garoobaan 6 bilood, Qodobka 6aad ee sida ururada loo kala reebayo doorashada anigu waxaan 20% sidii hore xeerku u qorayay ururka Gobolkiiba 20% ka hela, halka wakhtiga waxan u deyn lahaa in 10 sano ee ku qoran, ururadana 3da soo baxa uun mooyee, yaynaan sharciyayna ururo kale.

    **Qodobka 8aad/ (B)** marka ay ka helaan wasaarada warfaafinta-----Qodobka 12aad- waxaan qabaa waa in loo daayo xisbiga haduu dib u soo sharaxdo, Qodobka 16aad- waa in lagu daayaa inuu muslim yahay, lagana reebo inuu deganyahay Somaliland, Qodobka 18aad- waa in la hagaajiyaa qoraalka, Qodobka 19aad- hadyada halkay ku qoran tahay halaga saaro, halka ganaaxa waa in aad loo adkeeyaa, oo marka hore loo digaa marka denbaana shaahaadada lagala noqdaa.

    Qodobka 26aad- F/7aad- waa la dhigaa Gudidda Diiwaangalinta halkay ku qoran tahay barlamaanka Gudidisa arrimaha Nabadgalyadu, markaa halkaa waxaan leeyahay Gudida Diiwaangalintaa ku haboon.

20. **Ibraahin Axmed Haybe:-** anigu waxaan leeyahay marka ugu horaysa waa in diiwaangalin saxa aynu haysanaa, tan labaad waxaa su’aal iga ah yaa loo qabanayaa doorashada haanan Goboladii iyo degmooyinkii laka xadayn, markaa waa in laka saaro Goboladii iy degmooyinkii, waxaan qabaa Gudiddi diiwaangalin oo madaxweynuhu soo magacaabo 7 xubnoodba, mudadana waa inay joogaa 6 bilood ee ka danbeeya doorashada, Qodobka 2aad/F/3aad- waxaan ku dari lahaa sida ( Sida Gobolaysi), qodobka kala saarida ururada waxaan ka dhigi laha.
    **Qodobka5aad/F/1aad-** halka boqolayda ee ah 10%, anigu waxaan ka dhigi lahaa 15%, oo anigu tiradabaaba meeshaba waan ka saari lahaa, Qodobka 6aad/F7aad-anigu faqradaaba halkaa waan ka saari lahaa.------ lacagta debaajiga waxaan qabaa in iyana 180,000.000 laga dhigo.

21. **C/raxmaan Cismaan Caalin:-** hadaan too u guda galo xeerka, macaga xeerka waxaan odhan lahaa xeerka diiwaangalinta axsaabta Qaranka, marka hore anigu waxa ay il tahay in xeerka aynu ka horeysiino dood ku saabsan furashada axssaabta, waayo dadka ayaa u qaybsanaa,

Qodobka 1aad ee erey bixinta farqadii 7aad waxa ka maqan Internetka iyo waxyaalo kale.Q2/f2 farqadaasi mabaadiida guud ma gelaayso waa in laga saaraa, Q2/F4/ waa inlaga saaro waxa ka danbeeya (islamarkaa)Q2f6 halka ugu danbaysa waxaan ku daray farqadaas ( waa in waxay ku heshiiyaana la soo gudbiyaa) Q3 anigu waxaan qodobkaa odhan lahaa waa in loo daayo komishanka mar hadii ay tahay arin doorasho, gudidaas diiwaangelintana meesha waan ka saari lahaa.

Q4aad/f2/x- waa inlaga dhigo 180 Milyan ama 30 kun oo dollar Q5aad/f3/ t (500) qof ay ku taalo (5000) way ahaan jirtay hadaba waxaan odhan lahaa 5000 halagu celiyoQ6aad waxa u soo dhigayaa 10% ah dawladaha hoose 10% cododka gobolkaas hadaba wax is qabta maaha in layidhaa kuraastii xisbiga iyo codkiiba isku mid laga dhigo hadaba anigu waxaan soo jeedin lahaa 20% ha loo daayo.Waxaan soo jeedinayaa oo kale in 10 sano ee furida xisbiyada 5sano markiiba ayaan ka dhigi lahaa.

waxaan soo jeedin lahaa sadexda xisbi ee xisbiyada qaranka noqda mooyee sadexdan kale ee la leeyahey xisbiye dhexe oo kuwa kale hanoqdaan taas ma ogoli, Qodob/7- farqad ayaan ku dari lahaa oo qodob kaasi shan fiqradood ayuu ahaa hadaba farqada aan ku dari lahaa oo noqonaysa farqad lixaad waa sidan (xisbi xaakinka waxa ka xaaraan ah iney adeegsadaan ciidamada dalka iyo dhaqaalaha dhaqaalaha , Qodobka/f/kh-waa in lacadeeyo cadaalada sida loo qaadayoQodbka/x-waa in la cadeeyo gefka farqadaassi sheegayso.

Qodobka 11/f/1/b-waa in la sameeyo habraa ah qaabka ay isku soo sharaxayaanQodobka 12aad-waxaan laqabaa xildhibaanadii yidhi laba jeer ha laga dhigo hadii qofku dhaco, laakiin ma ogoli mar sadexaad oo meel qof leeyahay maahaQodobka -15aad-ururna ma isticmaali karo astaan ama magic hore (anigu waxaan qabaa in la isticmaali karo magacyada xisbiyada dhaca laankiin lama isticmaali karo astaan urur leeyahay.

Qodobka 16aad-ee ka hadlaya lamaanaha (anigu waxaan odhan lahaa manta yaa la eryayaa, farqadan waan ka saari lahaa oo xaaska muwaadin qabaa waa somalilander, Qodobka 19/farqada 2aad,farqadiisa3aad waxaa labadaas farqadood ku jira(deeqo,mucaawimo hadiyado)waxaan odhan lahaa kalmadahaas halagu daro erey-bixinta,

22. **Xuseen Maxamed Cige:-** anigu diiwaangalinta looma baahna shaqadaa waaa in loo igmadaa komishanka qaranka, halka ay ku qorantahay, (urur diimeed) meesha waan ka saaray, magacaabidana waxaan leeyahay Gudidda madaxweynuhu ha soo magacaabo, Qodobka 4aad, debaajiga waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo, 150,000,00 milyan, Qodobka 5aad- isna waxaan ka saaray kalmada u dhashay oo waxaan ka dhigay somalilander.

Qodobka 6aad-waxaan halkaana qabaa in kala reebida ururada la isticmaalo boqolayda, F/5aad iyana waa 5 sano mar laga dhigaa furista ururada, musharax doorashada ku guurldaraysta anigu waxaan qabaa waa intaasuu dhalinyaro yahaye, waxaan ku dari lahaa wuu iska soo sharixi kara xisbi kale, oo aan xisbigii hore aahayn

Qodobka 16aad waxaan ku darayaa kuna dhaqmaa diinta islaama.

Waxaan soo jeedinayaa:-

23. **Dr. Cali Yusuf:-** mudanayaal waxaa in badan laga dooday, in la sameeyo Gudidi diiwaangalin iyo Hawshaa Komishanku qabto, waxaa fiican inaynu xoogaa dib u yara noqono aynu eegno Gudidii hore ee Diiwaangalinta hawshii ay qabteen iyo hadii wax galdoloolyin ahi kayimaadeen, Gudidaa Madaxweynihii hore ee Ina Cigaal Alle ha u Naxariistee ayaa magacaabay, waxaana la ansixiyay 2001kii doorashadii G. deegaanku waxay dhacday 2002, Mudo dheer oo laba sanadood ku dhow ayay qaadatay intii ladu diyaar garoobay, Gudidu waxay ku dhiirigalinayeen cid waliba inay doorashadaa ka qaybqaadato, waxaanu u sheegaynay inay wixii ka dhiman samaystaan oo dhiirigalin farabadan baanu u samaynaan.

Komishanka Qaranku ma jirin, oo Gudidda diiwaangalinta ayaa horeeyay waayo ururo ma jirin, manta Komishanbaa jira, anigu manta waxaan u arkaa inay Duuplication ay tahay shaqo mid kaliya uu qaban karo ina laba loo qaybiyo ma qabo, xataa anigu intaan ogahay dalalka aynu jaarka nahay G. diiwaangalin ma laha, komishanka Qaranka ayaa hawshaa qabta oo ururada diiwaangaliya, Xildhibaanada qaarkood waxay soo jeediyeen in lacagta debaajiga lagu badiyo si restriction ugu noqoto inaan ururo badan la samayn, anigu waxaan qabaa sida xeerkii hore qorayay ee 5 milyan ayaan qabaa in loodaayo, waayo waxaa dhici karta in qof dhaqaalihiisu liitaa inuu ku wanaagsan yahay Xogaanka.

Lacagta mid ka balaadhan oo kala xadidaysa ayaa jirta, taas oo ah, Ururkasta waxaa looga baahan yahay, Gobol walba iyo Degmo walba inuu Xafiis ku yeesho, waxaa kaloo looga baahanyahay staff inuu yeesho iyo dad inay uga diiwaanganshahay oo uu meelwalba soo eego, markaa taasaa lacagta ka balaadhan, markaa lacagtaasi yaanay noqon dimuqraadiyadii oo gidaar weyn lagu xidhay, hadaan qodobada u daadego, Qodobka 1aad/F/F4aad- eray ayaan ka badalyaa oo ah (Golaha wakiilada meeshay ku tuula waxaan u badalayaa Xeer-dejint ama Baarlamaanka), Qodobka 4aad/F/2aad-lacagta lacagta ha laga dhigo ugu badnaan $2,000 oo Dollar. Faqrada labaad Xarfaha (KH iyo R) waa isku mid, laakiin R ayaa buuxda markaa KHda Ha la masaxo, oo kaa ay soo saxeexeen Xubnaha ayaa saxa. Xarafka (S)- ma cada wuxuu ka hadlayaa codsada diiwaangalinta iyo qabashada arjiyada, markaa 2% lama gaadhin, oo waxaa lagu ogaanayaa markay isdiiwaangliyaan oo Gobolada tago. Halka ururkasta 500 inay diiwaangashantahay ah dadkii wuu kordhay oo bari ayay ahayd, markaa waxaan leeyahay 1000 qof ha laga dhigo.

**Qodobka 5aad/F/3(T)-** sabaha uu komishanku ku diidi karo inuu diiwaangaliyo urur, halkan restriction fara badan baa ku jira, waxaa ka mida inuu Ururku abuuro rabshada, markaa ururkii hadaan la diiwaanglin maxaa lagu ogaaday inuu rabshad sameeyay, markaa inta ka horaysa waxaa la eegayaa, xeerka iyo wuxuu ururku soo qortay. Faqrada 7aad waxay leedahay (inuu ururkaasi ogolaado ama doono isticmaal awoodeed ama qalalaase looga danleeyahay in lagu qaado u jeedooyin siyaasadeed, taas lafteedu registration buu ururkii marayaa markaa lama odhan karo, markaa muda shaqada ku meel-gaadhka ah waa dastuurkood iyo waxay kaambaynkooda la eego, iyo xafiisyadooda Gobolada.

Qodobka 6aad- wuxu ka hadlayaa Xisbiyada uun markaa waa Ururadana lagu daro siyaasadeed eek u meel gaadhka ah, Faqrada 8aad halkaa waxaa lagu darayaa waxa looga baahanyahay, ( oo qaangaadh ah, miyirna qaba), faqrada 11aad- xulida xisbiyada waxaan qabaa in Xeerkii siduu qorayay loo daayo, hadii la yiraahdo Gobol walba 20% haka helaan in xisbigaadha la waayo ayaa dhici karta, xildhibaanada qaarna waxay soo jeediyeen in 10% ay helaan, markaa taasina waa risk, waxaan qabaa in sidii ay ahaan jirtay xeerkii hore ha loo dhaafo.

Qodobka8aad-Xuquuqda xibiyada siyaasadeed, Faqrada 1aad- halka ay ku taal ( Hay'adaha Ku shaqada leh) waxaan ka dhigi lahaa ( oo waafaqsan dastuurka iyo xeerarka dalka), Qodobka9aad/F/4aad- cida loo soo qorayaa warqada iskaga baxa kuma qorna markaa waxaan ku badalay ( Haduu xisbi yahaya inay komishanka u qoro, haduu ururyahayna Ururkiisa Golaha ha u qoro inay xubintaasi ka baxday) Qodobka sababaha lagu waayi karo Xubinimada, Faqrada2aad- waxay leedahay ( ka qaybqaadashada ururkale ee la samayno) markaa taasi maxay noqonaysaa ma ka qabgal mise haduu too uga qaybqaato,) markaanu hadaanu si toos ah ugu biiray bay noqonaysaa, Faqrada 4aad-waxay sheegaysaa haduu si caama ugu ololeeyo samaysiga ururkale waxaa loo qaadanayaa inay iska casileen ururkii hore, waxaynu halkan u fadhinaa inaynu samayno in furo ururo kale, gidigeena 3 xisbi baynu ka tirsanahay, ololaha aynu maaha in necessary loo qaato inaynu ka baxnay, kolkaa faqradaasina waa laaxin, markaa waxaan odhan lahaa waa in laga saaraa.

Halkan waxaa ku taala (hadii ay dhacdo xisbiga madaxweynaha iyo ku-xigeenka talada dalka hayaa, ay u gudbiwaayaan xisbi Qaran, Tartanka Doorashada Golaha deegaanka, ay isu soo sharaxi karaan si madax banana), qodobka waxaan u arkaa inuu yahay qayru dastuuri, oo dastuurkeenu ma ogolo Musharax madaxbanaan, waxaan aaminsanahay in haduu xisbi xaakinku tartanka la galo ururo soo baxay inuu hadhayo ma aaminsani, Qodobka 13aad-astaamaha iyo Magacyada, waxaan ku daray iyo ( mid diineed) waayo hadaynu la baxno magacyada sida xisbulaah, inkastoo ay banana yihiin, ma banana in wax quraan ama diin ka muuqato la isticmaalo, Qodobk 15aad- isbadalka hogaanka, halka 15 cisho aab bay badan tahay markaa 2 cisho waa in lagu sheegaa.

**Qodobka 16/F/4aad-** waxaan leeyaha maamulka Gobolada iyo Degmooyinka waa inaan xeerkood lagu dhaqmin mid uu badhansaab iska samaystay waa inaan lagu dhaqmin, ee Xeerka Amniga waa in lagu dhaqmaa, Hantida xisbiga, waxaa laga hadlay in Hanti dhawr loo diro, markaa anigu ma qabo in xisbi hantidhawr loo diro, xisbigu isagay dantiisa tahay inay hantidhawr madaxbanaan samaystaan, laakiin maaha inay xukuumadu ku maamusho, inay shisheeye qaadhaan ka helaana dee iyadu way reebantahay oo dastuurkaa sheegaya, Qodobka 20aad/F/3aad- waxaan leeyahay, taasi waxay ila tahay ururka ama xisbiga shir Golaha dhexe ay yeesheen waa inay ka soo baxdaa, hadii komishan iyo loo diro oo ay dhahaan cidaas iyo cidaas baa la badalay, is qabsi baa imana, markaa hadii Golaha Dhexe ee xisbiga ama ururku intuu isu yimaado, xeerarkooda way badali karaan, halka Ganaaxa ee 20,000,000, markaa ganaaxaasi wuu badan yahay, ganaaxyadiina lama kala sheegin, markaa waxaan odhan lahaa 1,000,000 ( Hal milyan oo shilling) ha laga dhigo. Waad mahadsantihiin.

24. **Maxamed Barkhad Miigane:-** Runtii waxa weeye wadanku marxalado badan buu soo maray, in aad iyoaad aan uga fiirsano waxwalba weeye, hadii aan toos u galo xeerka, waxaan leeyahay wax badan baa ka horeeya, xisbiga Kulmiyena wuu ku mahadsanyahay hadii waxyaabuhuu ku ololeeyay ka dhabeeyay, Laakiin madaxweynuhu Gudi buu u saaray ka soot ala-bixisaan sdiay u qornayd, sharciyada ku gadaaman Furasho ururo iyo saamaynta dhaqaale iyo nabadgalyo ay ku leedahay furitaankaasi qaranka, waxaa dhacay gudidii gobaladay u baxeen waxayna soo qaadeen sample yar, samplekaa hadaan Percentagkiisa eegno waxa weeye, .03%, sampleka intaa le'egna waxba kama jiraan, markaa waxaan arkaynaa inaanay aragti dadweyne soo qaadin, Kamana turjumayso.

Tan kale saddexdii sharci yaqaan ee adeegsadeen, waxay yiraahdeen arrintaasi sharci maaha, madaxweynuhuna wuxuu weydiiyeen ina sharciyda ku gadaaman ay soo geen, tiina way ka tageen, Xeerarku waxay ka dheegmaan dastuurka, anigu maan arag meel ay dastuurka kaga taalo furida ururadu, hadaan u soo daadego xeerkani waxay ka dhigeen gudidu wax ka badalka iyo kaabista xeerka nidaamka axsaabta iyo ururada siyaasada, xeerku waxa weeye, xeerka diiwaangalinta ururada iyo axsaabta siyaasada, xeerkuna waa bilawgii dimuqraadiyada Somaliland.

**Qodobka3aad-**Gudida diiwaangalineed waa inay jiraan, waana ku raacsanaahy sidii la yidhi waa 7 xubnood, waxaana leeyahay **3** madaxweynuhu ha soo magaaco, **2na** civil societygu ha soo magacaaban waliba labada sharci yaqaan soo doortaan, **2** kalena labada xisbi ee iminka jira, gudida diiwaangalintu ay iska madaxbanaan tahay, **Qodobka 4aad-** halka deebaajiga, anigu waxaan leehay tigidh lagu galayo film, arrintaa lacagta in la adkeeyo weeye, nin ma bixinayo oo waa inay xisbigu iska ururiyaan, haday ugu yraato, inay 15 urur is –diiwaangaliyaan, 15kaa urur, 3 xisbi ayaan 370 uga baahnayn oo waliba gobolada wax maqan yihiin, markaa 15kaasi haday is diiwaangaliyaan waxay noqonaysaa, inay noqonaysaa 6380 qof inay is-diiwaangaliyaan inay isu

soo taagaan golaha deegaanka. Markaa qolka lagu codaynayo dad badan baa soo galaya, marka aminga yaynaan wax u dhimin.

**Qodobka 6aad-** kala reebida xisbiyada iyo ururada waxaan taageersanahay in loo raaco qodobkii hore ee kala reebida xisbiyda iyo ururada ee Xeerkii 14 ee hore, waa ku adkaa siday loo kala reebayo wuu ka adkaa kan, madaama ururadii intii ay ka badnaanayaan, in waxa lagu kala reebayaa uu noqdo wax adag, sida xeerkii hore loogu kala reebay dhigayo ayaan anigu ayidsanahay. Tan kale ee Carka Voterka, waynu ognahay Carg voter ah oo Valid ah wadanka ma yaalo, markaa waa in diiwaangalin cusub la sameeyaa, waynu ognahay inay sheegeen hay'adihii kaga hadleen, oo yiraahdeen ma kala saari karno, laakiin si aan wax kale u dhicin ayaan ugu galnay, markaa taasi macquul maaha, in tii hore la ogolaadaa, markaa diiwaangalin cusub la sameeyaa, oo wax walba goobta lagu saxaa.

Anigu waxaan qabaa saddexda xisbi ee soo guulaystay, shuruudooda maahee, loogama baahan diiwaangalin iyo waxaa, wax kaloo looga baahanyahay ma jirto waa xisbi soo shaqeeyay, Qodobka26aad- halka Gudida nabadglayda ee Golaha Wakiiada ku qoran tahay, wax shaqo oo Gudidu ku leedahay ma jirto, waxaan odhan lahaa komishanka ha lagu badalo, tan kale nin xildhibaan ah, xisbi uu ka soo baxay, si dhibyar ugama bixi karo, wadamo badan oo afrikaan ah oo aan soo marnay, kama dhici karto in uu xisbigii uu siyaasadiisa sitay uu si yar kaga baxo, Hantida xisbiga, Hantidhawr ma baadhi karo, barnaamijka ururku uu leeyahay, Gudida diiwaangalinta uma keenayo, waa inuu u keenaa xeer hoosaadkiisa iyo sharciyadiisa, laakiin maaha in barnaa mijkii uu doorashada ku galay keeno.

25. **Cali Xasan Maxamed:-** Anigu ku raagimaayo doodu inbadan bay soo socotay, dhawr qodob ban taabanaya, Qodobka 3aad- waxaan waafaqsanahay mudanayaashii soo jeeediyay in laba gudi laga dhigo, oo Gudi Diiwaangalineed la sameeyo, oo ka madax banaan komishanka, halka Shuruurdahana waxaan ku darayaa Faqrada 8aad- faqradan oo sheegaysa inuu musharaxu 3 sano ee u danbeysay inuu dalka joogo, anigu waxaan leeyahay, waa cadaalad daro markaa gabi ahaanba taas meesha ha laga saaro, sidoo kale wxaan waafaqsanaahay Mudanyaashii yidhi, 7 xubnoodba madaxweynuhu ha soo magacaabo,

Mudada Gudida xilkeedu ku eegyahay waxaan qabaa inay noqoto (sanad ka dib marka doorashadu qabsoonto), **Qodobka 4aad** Debaajiga 120,000,000 baan ku waafaqsanahay oo aan u dayn lahaa, Qodobka kale, ee kala reebida mudayaasha, waxaan qabaa in 20% laga dhigo, tirada ugu badan marka leeyahayna waxaan odhan lahaa gobolada ha lagu saleeyo, markaa hday isku mid noqdaan, siday Gobolada ugu kala cod badan yihiin, aakhirkana kan ugu badan tirada guud, ayaan qabaa, haday simaana markaan waa lagu celinayaa.

Qodobka6aad/F/6aad- faqradi qodobkii horey khilaafsantahay, markaa ilayn kuraasi tirimaynee, halaga saaro taana, Qodobka- musharaxa madaxa banaan, anigu waxaan dastuurka 130 Qodob, meel ay kaga taal ma jiri karo musharax madax banaan maan arag, baarlamaankaa loo daayay,

baarlamaankii horena wuxuu qaatay inaanu jirin sida xeer 14 ku qornayd, inana hadaan banayno, wax diidayaa ma jiraan, markaa waxaan qabaa halkaasi, in Madaxweynaha iyo ku xigeenkiisu hadi xisbigoodu hadho ay musharixiin madaxbanaan noqdaan, waana inay astaantii cusub samaystaan, iyagoo isku dhafana ay musharaxiin madax banaan, isku soo taagaan.

**Qodobka 16aa/F/3aad-** oo ka hadlaysa da'da, xeerarkii hore waxaa ku qornaa, 40 iyo 45 jir, markaa waxaan qabaa in dhalintu ka qayb qaadan karaan talada, sidaa darteed taa waa in meesha laga saaraa- hadii kale waa in laga dhigaa25 jir, Qodobka 22aad-waxaa ku qoran 5 malyuun oo ganaaxa, waxaan odhan lahaa xisbi xeer dhan jabiyay 5 milyan in lagu ganaaxaa way yartahaye, waxaan ka dhigayaa 25,000,000 ( shan iyo labaatan malyuun), Qodobka 25/F/- waxay iyadu khilaafsantahay qodobkii 6aad, markaa taana meesha ha laga saaro, Faqrada kale ee ka hadaylaysa in Golaha wakiiladu xisbiyada dimuqraadiyada ku ilaaliyaan, iyana waxaan u badalayaa oo kaga haboon Komishanka Qaran.

26. **Xasan Cawaale Caynaan:-** Marka hore waxaan u mahadnaqayaa Gudidda xeerka inoo keentay, hadaan xeerka toos u gudagalo, waxaan waa faqsanahay in Gudi diiwaangalineed la sameeyo, sababtoo ah hadii la yiraahdo, komishanka ha loo dhiibo dee komishanka xisbiyaa soo doortaye, waxaa kaga haboo iyadoo Gudi madax banaan oo Gudida diiwaangalinta ah la sameeyo, Qodobka3aad/F/3aad- waxaan halkaan leeyahay waxaan qabaa in madaxweynuhu soo magacaabo 3 xubnood, Golaha wakiiladuna 2 xubnoo, Golaha Guurtiduna 2 xubnood, Halka ay Golaha wakiilada gudida arrimaha gudahaa soo xulaysa ay kaga qoran tahayna waxaan ka dhigayaa, Gudida joogtadaa soo xulaysa.

    Lacagta deebaajiga ah, waxaan odhan lahaa way badantahay 120,000,000 milyan, markaa anigu waxaan ka dhigi lahaa 90,000,000 milyan, waxaana ku sii dari lahaa, 3 xisbi ee jiray kuma jiraan kuwa bixinaya waayo iyagu horey u soo shaqeeyeen oo wax badan baa ka baxaye, halka qodobku qoray 3 bilood mudadooda, waxaan taana ka dhigay 6 bilood halaga dhigo si ay hawlahood ugu soo dhamaystaan.

    Qodobka 6aad/F/1aad- boqolayda loogu soo baxayo xisbinimada, anigu taas waxaan ka dhigi lahaa in 5ta Gobol laga dhigo15% ururka hela, halka Gobolka M/jeex laga dhigo 25%, ururka ka helaa xisbi noqonaya, halkay ku qoran tahay ururka Gobol walba ka hel 5%, waxaa loo aqoonsanayaa urur wuxuuna ka qayb galayaa doorashada Golaha deegaanka, **anigu halkaas waxaan soo jeedin lahaa** in 3 urur ee u soo baxa xisbinimada mooyee inta kale ay kula biiraan xisbiyada. Waad mahadsantihiin

27. **Farxaan Maxamed Cali:-** horta marka hore waad salaaman tihiin, intaan xeerka u galin laba qodod baan ka halayaa, kan hore waa mabaadiida Guud ee xeerkan wax ka badalka loogu sameeyay, waxay ka timi baahi dadweyne, taas ayaana keentay in manta xeerka wax laga badalo, intaa markaan ka soo gudbo halka Qodobka 1aad- eray bixinta waxaan ku dari lahaa ( dabagalka axsaabta iyo diiwaangalinta tira koobka), Gudidda diiwaan galina anigu waxaan u daynayaa sida

qodobku sheegayo, waxaana la qabaa mudanayaashii hore, in Gudidda madaxweynuhu soo magacabo, wakhtigoodana waxaan ka dhigi lahaa 5 sano, halkaa qodobka waxaan ku dari lahaa faqrad 6aad- oo inay goob joog ahaadaan xafiisyada ururadu gobolada ka furayaan, oo taana xaqiijiyaan.

**Qodobka4aad-** Debaajiga waxaan waa faqsanahay inta xeerku sheegay ee **120,000,000ka** milyan, **Qodobka 5aad/F/5aad (T)** halka ay ku qoran tahay kalmada Laamo, waxaan ku badali lahaa (Xafiisyo), oo ah Xafiiska gobolada, Faqrada9aad- halkaa golayaasha waxaa ka maqan Golaha deegaanka markaa halagu daro, iyo Golaha Deegaanka, **Qodobka 10aad** iyo Qodobka **25aad** waa in la waafajiyaa, sidoo kale waa xisbigiii laga dhigin wax si basiida looga bixi karo.

Qodobka 16aad- halka waa in la maanihiisa waa inuu Somaliland noqdaa, horta lamaane xaaskuu u jeedaaye, wax badan baa loo isticmaali karaa, Qodobkaasi waa khalad maaha in xaqiisii qofka lagu waayi sisyo, xaaskaaga ajnabi ah, markaa qodobkaa halaga saaro**,** **Qodobka 24aad**- ee leh Hanti dhawre ha loo diro xisbiga baadha, xisbi dhisan oo nidaam leh in hanta-dhawre loo diraa waa sharaf ka dhac xisbinimo, markaa meesha ha laga saaro.

Qodobka 25aad/F/7aad- halka ay ku qorantahay in Golaha Wakiilada ayaa xisbiga ku ilaalinaya dimuqraadiyaa ay ku qoran tahay, oo Gudidda arrimaha gudahaa uga masuula, anigu qodobkaa waxaan leeyahay Gudidda Diiwaangalinta ayaa kaga muhiimsan. Waad mahadsantihii.

28. **Maxamed Jaamac Cilmi:-** marka hore intii badnayd waa la sheegay, waxaan u hambalyaynayaa furitaankaa la furay ururada xisbiga kulmiye, wadanka waxaa ka jira, Gobolo iyo degmooyin badan, xuquudoodii dawladuna way dayacday inana waan ka seexanay, horta waa masuuliyad taariikhiya inay dadkaasi iyo Goboladaasi ay waayaan, xaqoodii, arrinta Gudidda diiwaangalinta ayaan qabaa loo dhiibo, komishanku qaranka waxba u dhiiban mayno, oo waynu garanaynaa diiwaangalintii khaldanayd ee doorashada lagu galay, markaa 7daa Gudida Diwaangalinta aan u dhiibano ayaan qabaan, oo ay ka mid noqdaan culimada sida sh. Dirir iyo aadan siiro.

Qodobka ganaaxa 5 milyan ah, waxaan ka maqan cidii ganaaxa qaadaysay, horta cida wax ganaaxdaa waa maxkamadaha, markaa waa in saxaa, Gudidda Diiwaangalinta mudadeeda waxaan ka dhigi lahaa 2 sano, 15-20 waa in lagu cadeeyaa qaabkeedo iyo woxoodoo dhan, oo ay u qadimaan Gudidda diiwaangalinta, Qodobka 5aad(X)- halka 500 oo qof ay ku qoran tahay ha laga saaro, ilayn diiwaangalinba ma jirtee.

**Qodobada 9,13 iyo 15aad-** dhamaan waan ka saarayaa oo dastuurkay ka soo horjeedaan, qodobka ka halaya lamaanaha isna waa qayru dastuuri, waa in meesha laga saaraa, xuquuda axsaabta waa iskuwada mid, markaa waa laga qaadayaa debaajiga, halka ay ku qoran tahay ururo hadhay waxaa la siinayaa qaarkood shahaado, halkaa wax la siinayaa ma jirtee, 3 soo baxay mooyee inta kale ha kukala baydhaan, halka ay ku qorantahay Gudida diiwaangalintu waxay yeelanaysaa Guno, xeerbaana qeexayaa, yaa xeerkaa samaynayaa.

In hantidhawr loo diro axsaabta oo la baadho, waan khalad, waan ka soo horteedaa, waxaan ku soo gabo-gabaynayaa,

**Waxaan soo jeedinayaa: -** hadii aan la helin oo aan lagu soo qorin xeerka sida lagu galayo, ilayn sharcigii hore ee doorashadu wuu dhamaadaye, markaa hadaanu xeerkani aanay qornayn sida lagu galayo, halkaasi ka fiirsi bay u baahan tahaay.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl** |
| **----------------------------------------------------------** | **-------------------------------------------------** |